



PORTLAND PUBLIC SCHOOLS

REOPEN

Xusuusin iyo Waxyaabihii ugu Dambeeyey ee Waaxda Gaadiidka PPS

Maarso 28, 2021

Qoysaska Qaaliga ee PPS,

Iyada oo aan isku diyaarineyno inay ay ardaydu ku soo noqdaan dhismayaasha iskuulada, Waaxda Gaadiidka PPS waxa ay jecel yihiin inay idinla wadaagan waxoogaa xusuusin ah iyo waxyaabihii ugu dambeeyey sidii ay uga caawin lahaayeen inuu ardaygaagu ku yimaado waqtigii loogu talagalay in la yimaado iskuulka si nabadgelyo ah una qaadan lahaa waxbarashada iskudhafan ee iskuulka lagu bixinayo.

Dariiqyada baska ee ardayda K-5 iyo goobaha ay basaska laga soo raaco ama lagaga dego waxaa laga heli kartaa bisha Maarso 29keeda halkani ee [Shabakada Gaadiidka PPS](#). Dariiqyada ay maraan basaska ee ardayda fasalada kale waxa ay diyaar noqon doonaan todobaadka Abriil 12.

Si loo xadido suurtagalnimada inaad la kulanto cid qabto xanuunka COVID iyo si hoos loogu dhigo tirada ardayda la raacaysa basaska PPS, waxaan ka codsaneynaa waalidiinta/daryeelayaasha, markii ay suurtagal tahay, inay soo qaadaan ama la soo lugeeyaan ardaydooda marka ay ka imanayaa iskuulka ama guryaha ku soo noqonayaan. Sidoo kale si loo yareeyo ciriiriga iskuulada, waxaan ka codsaneynaa waalidka ardayda waaweyn inay ku dejiyaan ardaydooda meel u jirta dhowr sakadood una ogolaadaan inay ardaydoodu iyaga oo badqaba uga soo lugaayeen iskuulka.

Intaas waxaa dheer, fadlan waxaad dib u eegis ku sameysaa [Liistada Maalin Walba ee Isbaarista](#) calaamadaha, soo wargalinta iyo shuruudaha guri jooga ka hor inta aan ardaygaaga loo ogolaan inuu raaco baska.

Imaansha iyo ka soo noqoshada Waxbarashada Iskudhafan ee Iskuulka Lagu Qaadanayo:

- Marka aad baska la socotaan, ardayda waxaa looga baahan yahay inay xiran yihiin maaskarada/afsaabka haddii ayna ardaydu naafo ahayn oo taasi ku keeneyn dhib inay xirtaan maaskarada.
- Lama oggola in basaska lagu dhex cabo sharaab ama lagu dhex cuno cunto inta baska lagu dhex jiro.
- Waxaad dooraataa inaad fariisto kursi ku yaala daaqada baska xaggiisa hore ah ama xaggiisa dambe ah taasi oo kor u qaadaysa in ay hawo fara badan dhex socoto baska. Basaska waxaa lagu qalabeeyey qalabka hawada dhaliya ee sifeeya isla markaasi ka saara wixii hawada ku jira.
- Marka ay ardaydu raacayaan baska waxa ay buuxin doonaa safafka dambe si loogu hoggaansamo inay ardaydu kala fogaadaan.

- Ardayda waxaa laga codsan doonaa in kursigiiba hal arday ku fadhiisto. Si loo helo boosas waaweyn, waxaa walaalaha la weydiisan doonaa inay wada fariistaan.
- Basaska waxa la nadiifin doonaa marka kasta oo jidkii ay ku dejinayeen ama ka qaadayeen maalintii ardayda dhammeystiraan.
- Ardayda xannaanada caruurta waxaa laga rabaa lagula kulmo goobta baska laga raacayo ama lagaga degayo. Ardayda xannaanada caruurta waxaa laga rabaa inay xirtaan calaamada jaalaha ah ee baska taasi oo darawalada ku garanayaan ardayda sidii ay ula kulmi lahaayeen.
- Ardayda fasalada 1aad ilaa 3aad waa inay xirtaan calaamad cad taasi oo u oggolaaneysa inay darawaladu gartaan ardaydu inay taagan yihiin goobtii saxda ahayd, laakiin looma baahna in la kulmo. Haddii ay waalidiinta doorbidaan inay la kulmaan ardaydooda fasalada 1aad ilaa 3aad, waxaa ardaydooda loo oggol yahay inay xirtaan calaamada jaalaha, sidoo kale. MUHIIM: Haddii goobta baska uuna joogin waalid, ardayga xiran calaamada jaalaha ah waxaa lagu soo celin doonaa iskuulka.
- Iskuulka ayaa u daabici kara ardayda calaamadaha baska iyada oo darawalada basaskuna ay hayaan kuwa dheeraad ah haddii loo baahdo. Waalidiinta u baahan in ay ardaydooda la cusbooneysiyo calaamadaha baska waa inay la xiriiraan iskuuladooda.
- Haddii uu ardaygaagu yahay ardayda dugsiga sarre kaasi oo raaca Trimet markaasi Hop Pass waqtigani wuu shaqeynayaa ilaa inta laga gaarayo dhammaanka sanad-dugsiyeedka.

Dugsiyada Dadweynaha Portland (PPS) waxa ay qaadeen tallaabooyin taxadir leh sidii ardaydeenu u noqon lahaayeen kuwa raaca Nidaamyaada Heerka Hawlgalka: [Baaritaan Iskuulka/Baska](#), [Nadiifinta iyo Nadiifinta Baabuurta](#), [Goobta La Raaco /Goobta Baska Lagaga Dego](#).

Wixii macluumaad dheeraad, fadlan waxaad booqataa [Shabakada Gaadiidka PPS](#). Waxaad sidoo kale nagala soo xiriiri kartaa si toosa emailkani transportation@pps.net ama waxaad soo wici kartaa telefoonkani 503-916-6901. Waxa aanu sidoo kale sameynay fiidiyow gaaban ku tusaya waxa aanu ka rajeyneyno ardaygaagu inuu maalin kasta noqoto waayo-aragnimadiisa oo aad ka [daawan kartaa halkan](#).

Mahadsanid.